
HERITAGE INSTITUTE

# Dibu-eegista Maamulka Dhulka Soomaaliya




Diseembar 2023

# Tusmada


| | | |
|---|---|---|
| 1 | Nuxurka Daraasadda | 4 |
| 2 | Lahaansha Dhulka Soomaaliya | 5 |
| 3 | Nidaamka Sharciga iyo Maamulka Dhulka | 12 |
| 4 | Khilaafka Dhulka | 20 |
| 5 | Gabagabada iyo cilmibaadhis kale | 22 |
| 6 | Bibliography | 23 |

## Ku saabsan Qoraaga

Dr. Sureer Qaasim Maxamed, waxa ay jaalle cilmibaadhiseed la tahay Harry Frank Guggenheim oo ka tirsan Machadka Pembroke, ee Jaamacadda Cambridge. Cilmibaadhisteedu waxa ay ku foogan tahay raadraacyada akademiyadaha tacliinta sare ee quseeya siyaasadaha la xidhiidha lahaanshaha magaalaynta Afrika, iyo isku dhacyada ka dhasha rabshadaha siyaasadeed ee magaalooyinka iyo sida oo kale dibudhiska magaalaynta Muqdisho. Dr. Sureer waa hormuudka iyo isku-xidhaha Daladda Cilmibaadhista Magaalooyinka Afrika (ACRC) u qaabilsan arrimaha dhulka Muqdisho.

**Xuquuqda daabacaaddan © 2023 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

**© Heritage Institute 2023.**

# 1. Nuxurka Daraasadda

Maamulka dhulka Soomaaliya, waxa uu muddo tobannaan sano ah la cakirnaa khilaafyo,xasilooni darro iyo tamar la'aan dowladeed. Tan iyo markii ay duntay dowladdii Soomaaliya 1991, waxa burburay nidaamkii garsoorka iyo maamulkii dowladda, waxaana bilaabmay rabshado la xidhiidha dhul boob iyo khayraadyo kale oo muhiim ah, kuwaas salka ku haya dagaallo dhaqaale oo siyaasadaysan. Maanta, xiisadaha dhulku waxa ay xuddun u yihiin dildillaaca hadheeyay seeska siyaasadda Soomaaliya, waxaanay weli saamayn weyn ku leeyihiin hurinta khilaafaadka casriga ah. (Global Land Tools Network, 2020). Qaabdhismeedka maammulka dhulka Soomaaliya, waxa lagu qeexi karaa mid aan caddayn oo isku qasan, kaas oo ay isku murugsan tahay masuuliyadaha maammulkiisu, isna dabrayaan sheegashada lahaanshiisu, sida oo kale na la iska qabsanayo dhul ballaadhan, iyo in lahaanshaha dhulka madmadow badani ku jiro. Sidaa darteed, waxa dalka aasaaskiisa muhiim u ah in la fahmo nidaamka casriga ah ee maamulka dhulka, maadaama oo uu saamayn ku leeyahay hindisayaasha qaran-dhiska,nabadaynta, iyo nolosha maalin laha ah ee bulshada Soomaaliyeed.

Warbixintan, waxa looga golleeyahay in ay aragti guud ka bixiso xaaladda maamulka dhulka Soomaaliya, iyada oo qiimaynaysa taariikhda deegaanka, qaabdhismeedka sharciga isku dhafan, iyo dhaqanka lahaanshah, helitaanka iyo ilaalinta dhulka ee hadda jira. Habdhaqankani, waxa uu muujinayaa goldaloolooyinka aqooneed, koobnaanta tacliinta sare iyo tabaha siyaasadeed oo liita iyo sida oo kale kanshooyinka/fursadaha mustaqbalka cilmibaadhiseed. Cilmibaadhistani waxa ay ku qotontaa dibumilicsiyo loogu kuurgalay dhigaallada cilmiga iyo diiwaannada siyaasadda, iyada oo falanqayn dhammaystiran lagu sameeyay warbixinno daabacan, maqaallo cilmibaadhiseed, iyo diiwaanno siyaasadeed oo laga helay hay'adaha dowladda, ururrada caalamiga ah iyo kooxaha bulshada rayid ka ah. Natiijooyinka cilmibaadhistan ayaa loo bandhigay xeeldheerayaal muhiim ah (aqoonyahanno, jaangooyeyaal-siyaasadeed, iyo xirfadleyaal sharci), kuwaas oo kulan aqoon-iswaydaarsi ah loogu qabtay magaalada Muqdisho, 30, Juun, isla markaana qofqof u ansixiyay natiijada warbixintan.

Warbixintan, waxa loo agaasimay saddex qaybood. Marka koowaad, waxa ay qiimaynaysaa sida lahaanshaha dhulka Soomaaliya loogu qeexay dhigaallada cilmiga iyo kuwa siyaasadda, iyada oo xoogga saaraysa isbeddelladii ugu waaweynaa ee dhacay marxaladihii sooyaalka Soomaaliya (waayihii gumaysiga,dharaarihii xorriyadda iyo xilligii taliska militeriga). Mar labaadka, waxa ay u dhabbagalaysaa guud ahaanba sharciga iyo hannaanka maammulka dhulka Soomaaliya, iyada milicsanaysa qaybo ka mid ah sharciga iyo isku-dayadii dibuhabaynta xeerarka dhulka. Ugu danbayn, waxa ay cilmibaadhistu soo koobaysaa mawduucyada ugu muhiimsan siyaabaha khilaafaadka dhulka loogu qeexay dhigaallada cilmiga iyo kuwa siyaasadda, iyada oo isdultaagaysa waxyaabaha ugu waaweyn ee dhaliya khilaafaadka dhulka ee casriga ah.

# 2. Lahaansha Dhulka Soomaaliya

Qaybtan soo socotaa waxa ay ku salaysan tahay dibu-eegiso lagu sameeyay sida ay isku-dayada cilmiga iyo kuwa siyaasaddu u sawireen habdhaqanka lahaanshaha dhulka Soomaaliya. Dhaqannadani sinaba uma aha kuwo isku mid ah, waanay ku kala duwan yihiin bulshooyinka miyiga iyo kuwa magaalada, bulshooyinka xoolo-dhaqatada ah iyo kuwa deegaanka ahi, iyo sida oo kale, kala duwanaanshihii u shaxeeyay marxaladihii taariikhiga ahaa.

## *Qabiilka, dhulka iyo xuduudaha*

Sida uu xusay Cassanelli (2015, 98), "Loollanka ama tartanka ku saabsan dhulku ma aha wax ku cusub Soomaaliya." Inkasta oo ay caddahay in qaar badan oo ka mid ah caqabadaha cusub ee hadda ka jira dhulka Soomaaliya salka ku hayaan raadadkii colaadaha sokeeye, haddana waa muhiim in la fahmo marxaladihii taariikhiga ahaa ee ku suntanaa maammulka dhulka iyo istaraatiijiyadaha maarayntiisa, kuwaas oo weli ku lug leh qaabaynta dhaqannada maammulka dhulka Soomaaliya iyo tignoolajiyadda ku salaysan diiwaangalinta dhulka.

Michael Roth iyo John Bruce (1988, 1) ayaa habdhaqanka sooyaalka xoolo-dhaqatada Soomaalida ku sifeeyay "nidaam-caadeed si gaara wax loo kala leeyahay" halkaas oo ay " dadka oo dhammi si guud u wada lahaan jireen dhulka, balse uu deegaan kastaa si gaara ugu qoondaysnaa isticmaalka qabiil, jilib,jifo ama qoys." Nidaamyada hab-maammulka dhaqanka Soomaalidu, waa kuwo loogu talagalay in ay maareeyaan nolosha bulshooyinka reer-guuraaga ah, sidaa darteed, xidhiidhadooda ku salaysan dhulka, xuduudaha iyo maammulku waa kuwo qallafsan. Nidaamka bulshada Soomaalida waxa lagu saleeyay xidhiidhada qabiilka iyo abtirsiga. Si ka duwan nidaamyada leh xuduudaha iyo xadadka sida cad u qeexan, inta badan xuduudaha qabiilku, waxa ay ku qotomaan helidda dhul-daaqsimeedka ama daaqa, iyada oo loo siman yahay xuquuqaha dhulka iyo biyaha (Cassanelli, 2015, 9). Cassanelli (2015, 10), waxa uu qabaa in bulshooyinka xoolo-dhaqatada ah ee ku nool waqooyiga iyo badhtamaha Soomaaliya intooda badani xoogga saaraan "khayraadka biyaha joogtada ah" iyo nolosha bulshada, sida guurka, xallinta khilaafaadka iyo caadooyinka– ku gadaaman goobahan muhiimka ah. Inta badan, waxa ay khilaafyadu ka dhacaan meelaha lagu loollamayo helitaanka khayraadka biyaha, iyo dhul-daaqeenka. Mahadhooyinkan taariikhiga ah waxa weli jaangooya khilaafaadka casriga ah ee dhulka, maadaama "in badan oo ka mid ah khilaafaadka aynnu maanta aragnaa ku arooraan isku dhacyo taariikhi ah oo xilliyo fog ka dhex dhacay qabiillo deris ahaa oo ku loollamay dhul ama biyo" (Cassanelli, 2015, 8). Bulshooyinka deegaanka ah, sida beeralayda iyo xoolo-dhaqatada koonfurta Soomaaliya, "xuduudaha deegaannadoodu aad bay u xaddidnaayeen" waxaanay ku qoqobnaayeen deegaanno gaar ah.

Inkasta oo aanay jirin soohdimo xuduudeed oo aad u xidhani, haddana waxa jira xidhiidho taariikhi ah, oo u dhaxeeya xulufada qabiilka iyo xuduudaha gaboobay ee abtirsiga ku salaysan. Cedric Barnes (2006), ayaa ku doodaya in siyaasaddu si casriyaysan isugu lammaanaysay 'u dhashey iyo ku dhashey,'taas oo isku xidha xuquuqda u-dhalashada iyo tan ku-dhalashada, kuwaas oo ka hadla xidhiidho taariikhiga ah oo ka qotadheer kan ay inta badan ka hadlaan daraasadaha Soomaalidu. Sida uu Barnes (2006, 489), ku doodayo "waxa ay u badan tahay in aqoonsiga siyaasaddu ku salaysan yahay "asal-raacnimada" dhaqanka abtirsiga, kaas oo ay ku ladhan tahay xaqiiqooyin sooyaal oo ku taxan aqoonsi xuduudeed/…/ oo ku aroora xuduudo qabiil(qoys)." Cassanelli (2015, 20), ayaa soo jeedinaya in ku-dhaqmay(ama isticmaalay) tahay habraaca ugu muddakarsan, isaga oo u soo daliishanaya magaalooyinkii Soomaalida ee ka horreeyay gumaystaha.

Gaar ahaan koonfurta Soomaaliya, waxa laga helay caddaymo ka maragkacaya in gunnooyin iyo isgaashaanbuuraysi la gula macaamili jiray dadyowga 'doolka ah,' kuwaas oo uu Cassanelli (2015) ku tilmaamay nidaamka'martida iyo marti-soorayaasha'. Hab-nololeedkaas, waxa inta badan loo kala soocnaan jiray laba qaybood oo kala ah marti iyo marti-soorayaal: "marti-soorayaashu"' waa cidda ugu horraysa ee isticmaasha khayraadka dhul gaar ah, taas oo ay weheliso awoodaha ay ku maamulaan qoondaynta xuquuqaha ay dadka doolka ahi ku isticmaali karaan khayraadka deegaankaas' (Cassanelli, 2015, 17), halkaas oo ay 'marti-soorenimada' go'aamiyaan "hor-degista dhulka,iyo tirada iyo tooxa ay ku leeyiihiin deegaankaas, iyo sida oo kale xulufaysiga diimeed ee ka jira deegaankaas, kuwaas oo dhammaantood ku qotoma is-afgarad bulsho'(Cassanelli, 2015, 18).

Dhigaallada cilmiga iyo kuwa siyaasaddaba,waa lagaga dooday xidhiidhka ka dhaxeeya iyo heerka ay gaadhsiisan tahay saamaynta ay qabyaaladdu ku leedahay lahaanshaha dhulka. Inta badan, "bulshooyinka xoolo-dhaqatada ah iyo maammulladii gumaystaha, waxa ka dhaxeeyay xidhiidh kooban" maadaama "ay dadka reer-miyiga ahi ka fogaayeen xarumihii talisyada gumaystayaasha Ingiriiska iyo Talyaaniga, sidaas oo ay tahay, bulshooyinkaasi waxa ay weli sii wataan hab-nololeedkoodii ku salaysnaa lahaansha dhulka, kaas oo ahaa mid caado ah oo abtirsi ku dhisan" (Roth and Bruce, 1988, 2). Si kastaba ha haatee, waxa guud ahaan la isku waafaqay in qabsashadii gumaystayaasha Ingiriiska iyo Talyaaniga illaa maantadan, ay Soomaaliya saamayn ku lahaayeen xuduudihii hore ee beelahu iyo sidii ay qabiilladu dhulka u kala qoondaysteen, si loo maammulo, loona xukumo dad xoolo-dhaqato ah oo aad u guur-guura, (Cassanelli, 2015, 22). Iyada oo ay saamaynta qodobadani si weyn uga muuqato goobihii noqon lahaa xuduudo caalamiya, sida xuduudaha casriga ah ee Itoobiya iyo Kenya (Barnes, 2006), haddana saamaynta uu gumaysigu ku yeeshay kor u kaca xuduudda qabiilka, ayaa ah arrin muhiimad weyn u leh guud ahaan daraasadaha Soomaalida. (Kapteijns, 2013; Besteman, 1998).

Iyada oo loo marayo faragelinta sharciga,waxa ay maamulladii gumaysiga Talyaanigu, tijaabiyeen wax ka beddelka xuquuqda dhulka la wada leeyahay, si loo fududeeyo sahannadii uu gumaysigu ugu jiray in uu mashaariic beereed ka hirgaliyo gobollada koonfurta Soomaaliya. Guadagni (1979, 132), ayaa qeexay hababka ay faragalimaha la isku dayay ku keenayaan "baabiinta nidaamka wada lahaanshaha dhuleed ee qabiiliga ah iyo "diyaarinta shuruudo abuuraya qaab cusub oo lahaansho qofeed iyo mid doolba leh" (Guadagni, 1979, 142). Cawaaqib-xumooyinkii ka dhashay faragalimihii ay maamulka dhulka ku sameeyeen gumaystayaashii Ingiriiska iyo Talyaanigu, waxa ay ahaayeen laba qodob: tirtirka xuquuqihii dhaqanka iyo nidaamyadii maaraynta, iyo sida oo kale kor u qaadista isku xidhka xooggan ee u dhaxeeya aqoonsiga iyo dhulka(helidda iyo lahaanshaha dhulka). Tani, waxa ay saamayn qotadheer ku yeelatay maamulkii xorriyadda ka danbeeyay, waxaanay caqabad ku keentay maamulka dhulka ee haddeer casriga ah.

## *Sharcigii Xorriyadda ka danbeeyay*

Marxaladihii lagaga soo guuray lahaanshii dhaqanka ee gaarka ahaa(Roth and Bruce, 1988, 1), luguna degay lahaanshaha qofeed ee xorta ah iyo kiraysiga guryaha ee gaarka ah, waxa caadi ahaan lagu dhaabadeeyay hannaan sharci, laakiin si kala dhantaalan ayaa loo dhaqangaliyay. Wixii ka danbeeyay dharaarihii xorriyadda, waxa Soomaaliya ka hirgalay isbeddello muhiim u ah hannaanka maamulka dhulka. Horraantii 1960-naadkii, waxa jiray iskudayo lagu hirgalinayo dibuhabaynta lahaansha dhulka (Guadagni, 1979, 355; RVI, 2017), laakiin waxba kama ay fulin. Waxqabadyo laxaad leh oo sharci-dajineed ayaa la bilaabay waayadii maamulka iyo maaraynta dhulka, kuwaas oo yimi kadib markii uu talada dalka qabsaday nidaamkii "hanti-wadaagga cilmiga ku dhisan" ee Maxamed Siyaad Barre sannadkii 1969. Waxa ay ahady 1970-meeyadii, markii "halganka dhulka loogu jiro" laga beddelay lahaanshaha gaarka ah, loona raray hanti qaran" (Cassanelli, 2015, 24). Cassanelli (2015, 25), ayaa ku doodaya in ay tan dabada ka riixayeen dhowr arrimood oo muhiim ahi: kor u kacii qiimaha beeraha, baahidii loo qabay awoodda sharciga, taas oo dibujejin loogu sameeyay reermiyigii ka soo barakacay abaarihii iyo dagaalkii Odaadeeniya, iyo sida oo kale soo ifbixiddii in dhulka lagu kasbado abaalgud-siyaasadeed(land-based clientelism), iyo weliba kobocii korodhka magaalaynta (gaar ahaan magaalo madaxda Muqdisho).

Dhowr sharci oo muhiim ah ayaa la soo saaray,waxaana 1970 la ansixiyay Xeerka Ilaalinta Bulshada, oo ay dowladdu ku dhawaaqday, kaas oo amrayay in "dhammaan la tirtiro noocyada isbahaysiyada qabiilka, xuquuqaha, iyo maamuuska, kuwaas oo ay ku jiraan xuquuqaha dheeraadka ah ee lagu helayo dhul iyo biyo dheeraad ah," (RVI, 2017, 33). Inta badan waxqabadyada sharci-dajintu waxa ay diiradda saaraan waaxda beeraha, sida muddadii "u dhaxaysay 1970 iyo 1976, oo ay dowladdu meelmarisay in ka badan 22 xeer oo nidaaminaya waaxda beeraha"s(Roth, 1988, 6). Xeerka Dhulka ee soo baxay 1975, ayaa jidaynaya diiwaangelinta dhulka, waxaanu sida oo kale "dhulka oo dhan hoos geeyay maamulka dowladda" balse waxa kale oo uu saamayn ku lahaa tirtiridda qaababkii lahaanshaha dhulka ee ka jiray gobollada leh waxsoosaarka beeraha, iyada oo magacyo "aan habboonayn loo bixiyay dadkii ku cusbaa degaanka" (Besteman, 1994, 497), halka magacyo maamuusan loo bixiyay "ganacsatada, baayacmushtarka, iyo saraakiisha dowladda ee ka soo jeeda Muqdisho ama caasimadaha gobollada kale" (Besteman, 1994, 497). Si kastaba ha ahaatee, waxa muuqata in wax yar uun laga qaatay siyaasadaha ku salaysan diiwaangelinta dhulka, taas oo ay sababeen caqabado waaweyn oo la xidhiidha fulinta xeerarka, "waxaana dhulka Soomaaliya la diiwaangeliyay laba goor, oo kala ah 1986 oo la diiwaangaliyay boqolkiiba 0.5, iyo 1988 oo la diiwaangaliyay boqolkiiba 0.6 " (UN-HABITAT, 2008) , 145). Xeerkii Magaalaynta Dhulka ee 1973 (iyo wax ka beddelkiisii 1980) waxa curyaamiyay caqabado la mid ah kuwii ka hore taseeyay. Magaalaynta Soomaaliya, gaar ahaan Muqdisho, oo ah kuwa ugu dhow helitaanka xidhiidhada xafiisyada, ayaa inta badan faa'iido weyn ka helay intii ay socotay hannaanka diiwaangalinta lahaanshaha dhulka ee sharciga ahi (RVI, 2017). Ficil ahaan, waxqabadyadii sharci-dejinta ee xilligii Siyaad Barre (1969-1991), waxa ay abuureen dibuhabayn dhuleed iyo dhaqanno magacbixineed oo si kala dhantaalan loo qaatay, kuwaas oo ay weheliyaan musuqmaasuq iyo dabadhilifnimo ba'ani.

## *Dagaalladii sokeeye iyo caqabadaha dhulka ee casriga ah*

Aragtiyaha docayaalka ah ee ku aroora dagaalladii sokeeye ee Soomaaliya, ayaa dhaliyay halisaha rabshadaha. Sida uu qabo Bakonyi (2015, 253), "dad badan ayaa hadda u qaxay gobollada ay ku badan yihiin qabiilladoodu, kuwaas oo ay maamulkooda gacanta ku hayaan malleeshiya beeleedyo la qabiil ahi." Markiiba waxa ay deegaannadaas ugu yeedheen "gurigii hooyo" ama "gobolladii u dhalashada" kuwaas oo sii kordhiyey "xoogaysiga isbahaysiga abtirsiga ku dhisan eel eh xuduudaha beelaha". Dibu-xuduudaynta degdegga ah ee Soomaaliya ka dhacday ayaa ahayd mid ku dhisan aragtida qabiilka, waaxaanay xitaa gaadhay magaalooyinkii xadaaradaha iyo ilbaxnimooyinka taariikhiga ah lahaa.

Helitaanka iyo haysashada dhulka waxa markiiba lafdhabar u noqday siyaasadda ku dhisan loollanka ilaha dhaqaalaha oo ah halka ay daaran tahay xurgufta dagaallada sokeeye. Sida uu qabo (Cassanelli (1996, 23), "dhaqdhaqaaqyada maleeshiyaadka waxa hoos socday halgan lagu kala difaacanayo ama lagu kala riixanayo khayraadka dalka, oo awalba ahaa mid u sii dhuranaya saboolnimo." Waxa dhul-beereedka "markiiba qabsaday oo sheegtay dagaal-oogayaashii," maadaama uu "khayraadka iyo waxsoosaar Soomaaliya noqday rugta dagaalka", (Cassanelli, 1996, 23) waxaanu sida oo kale xusay in tobankii sano ee colaaddu socotay ay sahaydeen dad badan oo ka tirssanaa danyarta iyo beelaha la haybsooco, kuwaas oo la qabsaday dhulkii muhiimka ahaa ee ay degaanka u ahaan jireen. Dagaalka Soomaaliya ee ay salka u tahay siyaasadda dhaqaaluhu, waxa markiiba xuddun u noqotay helidda iyo hayshada kaabayaasha muhiimka ah sida (madaarrada, dekedaha iyo waddooyinka) iyo sida oo kale ilaha biyaha iyo dhulka carrasanka ah. Sida uu Cassanelli (1996) ku dooday, "waxa judhiiba soo ifbaxday in aanay qabqablayaasha-dagaalku ahayn kuwo ujeeddada dagaalkoodu yahay in ay ka guulaystaan beelaha cadowgooda ah, balse ay tahay in hantaan dhulka leh waxsoosaarka, adeegyada dekedaha iyo hantida ma guurtada ah ee magaalooyinka, kuwaas oo loo arkay fursad si joogto ah loogu heli karo masruuf nololeed iyo xidhiidho taageero oo bulsheed - dal iyo debedba."

Dhulkii hore ee danta guud waxa uu gacanta dowladda ka baxay, "guud ahaan dhulkii dadweynaha iyo dhismayaashiiba… oo la qabsaday 1991 iyo wixii ka danbeeyay" (Hagmann et al, 2022, 32), iyada oo ay weli qabyo tahay "dibusoocelinta" dhulkaasi tan iyo dagaalkii sokeeye. Dowlad la'aantu, waxa ay keentay in ay waddooyinka iyo goobihii kale ee xuddunta u ahaa isku-xidhka kaabayaasha si xun u baaba'aan oo ay sagxadda noqdaan, waxaana abuurmay kooxo mooryaan ah oo jid-gooyo dhigta dariiqyada muhiimka u ah isku socodka; si ay baad iyo cashuur uga qaataan safraha maraya jidadka(Hagmann et al, 2022). Dagaalka Soomaaliya ee ay salka u tahay siyaasadda dhaqaaluhu, ayaa weli siyaabo kala duwan u saameeya nidaamka maamulka dhulka Soomaaliya.

## *Xaaladda hadda Jirta*

Soo laabashada dowladnimada Soomaaliya ayaa ah mid weli kala dhantaalan, taas oo uu maamulka dhulku xudun u yahay caqabadaha ku xeeran xasiloonida Siyaasadda. Walaaca ku xeeran dhiillada xasilloonida liidata, ayaa ka dhigan in aanu jirin sharci qaran ama wax dadaallo ah, oo looga golleeyahay in lagu saxo boolida dhulkii la kala xoogay xilligii dagaalka sokeeye.

Maantadan, arrimaha dhulku waa dhibaato taagan, iyada oo murannada dhulka Muqdisho lagu qiyaaso 80%, marka loo eego kiisaska la horkeeno maxkamadaha gobolka. Sidaas darteed, waxa jira dhowr caqabadood oo ku lifaaqan haysashada dhulka, kuwaas oo saameeya maamulka dhulka Soomaaliya.

- **Maamulka dhulka Soomaaliya waxa lagu tilmaami karaa nidaam maamul oo ay hadheeyeen lahaansho isku qasan iyo madmadow badan, oo ay weheliso awood la'aan dowladeed. Waxa soo shaacbaxaya xaalado qasan oo aan la isku hallayn karin**–iyada oo ay maamullo kala duwani u tartamayaan aqoonsi iyo awood raadis. Tani waxa ay abuurtay nimaad ay ku hareeraysan yihiin caqabado aan caddayn oo ay dowladda iyo muwaadiniintuba ku wareereen fahankooda, iyada oo lahaanshaha dhulka ay xaqiijin karaan ama mulkiyaddiisa bixin karaan qaybo kala duwani. Arrintan, waxa lagaga hadli doonaa qaybta xigta ee daraasaddan.

- **Magaalaynta xawliga ah ee ka socota magaalooyin badan oo Soomaaliyeed, ayaa ka sarraysa heerkii awoodeed ee ay qaadi karayeen maamullada gobollada iyo magaalooyinkaasi**. Sida ay xustay Dibu-eegis uu Bangiga Adduunku ka sameeyay magaalaynta Soomaaliya(2020), ayaa sheegaysa in" korodhka xaddiga magaalayntu aad u sarreeyo– oo ay sannadkiiba ku kordhaan ku dhowaad boqolkiiba 4.3" waxaa la saadaaliyay in tirada dadka magaalooyinku "saddex jibaarmi karaan 30 sano gudahood." Tani waxa ay caqabado waaweyn ku noqotay maamullada magaalooyinka iyo gobollada, waxaanay culays ku keentay dhaqaalaha dalka oo markii hore ba ahaa mid kooban. Iyada oo ay goobaha magaalooyinka ah ee Soomaaliya ahaayeen "baro horumar," waxa jira walaac aad u daran oo la xidhiidha kobaca magaalooyinka oo ah mid aan qorshaysnayn, kaas oo ay weheliso dhibaatooyin ka ba'an ee dhulka ku saabsan, taas oo caqabado waa wayn ku abuuri karta mustaqbalka maamulka dhulka.

- **Murannada dhulka ee dabadheeraaday iyo khilaafaadka dhulka ee casriga ah ayaa weli ah waxyaalaha dhaliya xasillooni darrada iyo rabshadaha dalka ka jira.** Sheegashooyinka isku murugsan ee ku saabsan lahaanshaha dhulka miyiga ah iyo ka magaalooyinka ahiba waxa ay ka soo unkameen waayihii gumeysiga, xukunkii milatariga, iyo dagaalladii sokeeye. Waxa ay maanta arrimahani ka mid yihiin caqabadaha hortaagan in dibuheshiisiinta iyo deegaamaynta laga gaadho waxqabadyo midho dhal leh. Khataraha ka dhashay rabshadaha weli sii socda ayaa sida oo kale keenay isla xisaabtan la'aan baahsan, sida uu qeexayo halkudhegga Soomaalida casriga ah ee yidhaahda "ku qabso ku qadi mayside, "(Harris, 2015, 6).

- **Fulin la'aanta iyo awood darrada garsoorka,** ayaa ka qaybqaata caqabadaha la xidhiidha khilaafaadka dhulka. Xitaa xaaladaha ay shakhsiyaadku awood u yeelan karaan in ay maxakamadaha ku xalliyaan kiisaska la xidhiidha muranka dhulka, waxa wiiqa awood la'aan fulineed oo baahsan.Tani waxa ay keentay in maamulka garsoorku si weyn u naafoobo,taas oo dhalisay in rabshaduhu ku sii bullaalaan isla xisaabtan la'aanta jirta.

- **Dhul boobka, kor u kaca ganacsiga dhulka iyo in dhulka loo isticmaalo xoojinta xidhiidhka xulufooyinka siyaasadda iyo sumcad isu muujinta** ayaa xuddun u ah dhibaatooyinka maamulka dhulka. Maqnaanta fursado badan oo nacfi dhaqaale u leh dalka, ayaa maalgashiga dhulka miyiga ah iyo ka magaalada ahba ka dhigay shaqo dhaqaale oo muhiim ah. Haldoorka siyaasadda ayaa inta badan dhulka u adeegsada in ay ku kasbadaan taageero siyaasadeed, halka ay qurbajoogta dalka maalgashata iyo saraakiisha dowladdu dhulka u iibsadaan in ay mustaqbalka sii gadaan(Somalia Stability Fund, 2021, 24). Dhulka miyiga ah" waxa ay tani u muuqataa in loo qoondeeyo qiimo dhul-daaqsimeed iyo qaayo dhul-beeriseed, iyo sida oo kale in dhulka loo haysto muhiimad qodaal iyo mid shidaal iyo waliba in dhulka laftiisu ku yaallo goobo istaraatiiji ah oo dekado ka agdhow yihiin(Somalia Stability Fund, 2021, 24). Meelaha magaalooyinka ah waxa ay tani muujinaysaa koritaanka magaalooyinka oo ah mid xawaare ku socda.

- **Dhibaayooyinka ku salaysan arrimaha maamulka dhulka, waxa ka mid ah ismuquuninta iyo barakicinta qasabka ah,** maadaama bulshooyinka nugul lagu qasbo in ay ka doolaan/qaxaan masiibooyin deegaanka ku soo noqnoqda iyo sida oo kale colaadaha hura ee hubaysan. (Bryld et al, 2020; Bonnet et al, 2020). Ku dhowaad 2.6 malyuun oo dad ah ayaa gudaha ku barakacay, waxaanay ku godoomeen dhul aan lahayn adeegyo bulsho iyo xuquuqo asaasi ah toonna. (World Bank, 2020, 11). Inta badan, waxa ay barakacayaashu nafta kula eertaan magaalooyinka Soomaaliya, halkaas oo ay ka raadsadaan fursado shaqo oo ay ka mid yihiin dillaaliin iyo "waardiyeyaal" kuwaas oo ka dhex adeega mulkiileyaasha dhulka iyo maamuleyaasha kale, sida oo kale waxa ay nolol-maalmeedkooda ka raadsadaan noocyada gargaarrada bini-aadannimada ee markaa jira(Bakonyi et al, 2019). Bulshooyinka ku soo barakacay magaalooyinka Soomaaliya ayaa isu arka in ay ku waraayaan doolka iyo debed-wareegga, iyada oo ay aad u yar tahay xuquuqaha ay ku leeyihiin siyaasadda, waxaanay halis ugu jiraan hayaanka dhuleed oo aan joogsi lahayn. Hayaanku, xitaa waxa uu iman karaa kadib, iyada oo la siiyay gargaar laxaad leh oo maalgalineed, kaas oo u qoondaynaya dhul si cad u cayiman oo u suuragaliya negaansho iyo taageero(Bakonyi et al, 2019; Bakonyi, 2021).

# 3. Nidaamka Sharciga iyo Maamulka Dhulka

Waxa inta badan lagu doodaa in ay Soomaaliya ka jiraan saddex nooc, oo ah nidaam maamul dhuleed oo isku lingaxan: xeerka dhaqanka, sharciga Islaamka iyo Sharciga dowladda (Somalia Stability Fund, 2021; ReDSS, 2019). Guud ahaan waxa la isku raacsan yahay in aanu xeerku ahayn nidaam sharci oo si guud la iskugu waafaqsan yahay, kaas oo uu iskugu jira heshiisyo beeleedyo kala duwan oo jiilba jiil ka dhaxlay. Waxa uu xeerku si guud u maamulaa arrimaha gudaha ee la xidhiidha "xuquuqaha iyo waajibaadka ka dhexeeya qaraabada iyo qabiillada, waxaana lagu maareeyaa tabashooyinka gudaha, daryeelka bulshada, xidhiidhka siyaasadda, xuquuqda hantida iyo khayraadka dabiiciga ah," (Global Land Tools Network, 2022, 13) kuwaas oo ku xidhan taariikhda heshiisyada dhexmara beelaha ay qusayso, iyo nooca uu khilaafku yahay sida dhiig(qudh iyo qoon) ama dhaqan(xilo iyo xoolo). Warbixin ku saabsan Dhulka, Hantida iyo Guryaha Soomaaliya oo ay qortay (UN-HABITAT, 2008, 157) ayaa tusaalayaal ka bixinaysa mabaadiida guud ee la iskaga waafaqsan yahay xeerka Soomaalida, waxaana ka mid ah: bixinta magta, magangalyada waayeelka, wadaaddada, dumarka iyo carruurta…(iyo birmagaynada kale ee bulshada), waajibaadka qoyska ee ku salaysan guurka iyo carmalka, iyo in guud ahaan la dhowro" xeerarka ilaalinta khayraadka sida biyaha, dhul-daaqeenka, iyo khayraadka kale ee qaranka." Shabakadda Agabka Dhulka ee Caalamiga ah (The Global Land Tool Network, 2022) ayaa xeer-dhaqameedka Soomaalida u sii kala saartay xeerka qotida, xeerka daaqsatada iyo xeerka dabatada.

Inta badan maaraynta khilaafaadka dhulka marka loo marayo sharciga dowladda, waxa inta badan dhexdhexaadinta ka qaybgala oday-dhaqameedka. Waa ay ku kala duwan yihiin beeluhu awoodda ay u leeyihiin xallinta khilaafaadka dhulka, gaar ahaan marka aanay jirin qaab kale oo loo maareeyo khilaafaadka. Sida oo kale, dhexdhexaadinta culimada diinta iyo xukunka sharciga Islaamka ayaa lagu xalliyaa murannada dhulka. Tani waxa ay ku salaysan tahay nidaamka Islaamka oo ay saldhig u yihiin Quraanka Kariimka ah, Xadiisyada nebig(NNKH) iyo Fadwada culimadu. Sida lagu sheegay warbixinta Dhulka, Hantida iyo Guryaha Soomaaliya (2008, 155), dadka la waraystay way ka dheregsanaayeen mabaadiida guud ee Sharciga Islaamku ka qabo Xukunka Dhulka, balse waxa la ogaaday in ku dhaqankiisu kooban yahay. Si kastaba ha ahaatee, racfaannada loo qaadanayo maxakamdaha Islaamiga ah, ee la xidhiidha arrimaha dhaxalka iyo murannada dhulka, ayaa ku badan Soomaaliya. Si xukun caddaalad ah loo helo, waxa ay al-Shabaab sida oo kale abuurtay nidaam garsoor oo barbar socda nidaamka garsoorka dowliga ah, iyada oo adeegsanaysa xeerar, xeerbeegti iyo habab ay u fuliso xukunnada murannada dhulka. Marka laga yimaaddo nidaamka canshuur ururinta dakhliga, waxa ay al-Shaab door muhiim ah ka ciyaartaa u garsooridda murannada dhulka; iyada oo isku dayda in ay awood ku yeelato guud ahaan xadadka dhulka Soomaaliya.

Sida ay sheegtay Kooxda Dabagalka Qaramada Midoobay(2019, 14), " al-Shabaab… waxa ay bixisaa qaar ka mid ah adeegyada asaasiga ah sida kuwa la xidhiidha hawlaha dowladda, iyada oo aan xitaa goobahaas si muuqata u xukumin." Si ka duwan nidaamka caddaaladda dowladda, oo ah nidaam loo arko mid "kharash badan, daba-dheeraada oo aan la saadaalin karin" (UN Monitoring Group, 2019, p.14), waxa ay al-Shabaab adeegsataa nidaam loo arko in uu ka caddaalad wanaagsan yahay marka la barbardhigo garsoorka nidaamka dawladnimada oo ah nidaam siyaasad ahaan cakiran. Kooxda dabagalku waxa ay ku doodaysaa in "xukunka aasaasiga ah ee al-Shabaab samayso iyo helitaanka dacwadaha garsoorku… yihiin kuwo ay racfaankooda ka xisaabtami karaan qaybo ka mid ah dadwaynahu." farqiga ugu weyn ee u dhexeeya maxakamadaha dowladda iyo kuwa nidaamka al-Shabaab waa awoodda fulinta.Iyada oo laga cabsi qabo carqaladaha iyo halisaha ka dhalan kara rabshadaha, waxa xaaladaha qaarkood, maamulka iyo fulinta xukunnada xasaasiga laga hor mariyaa in la danbabaso xukunnada qaarkood (Maxamed, 2021). Inta badan xukunnada ay dowladdu fulintooda ku fashilanto, waxa racfaan looga qaataa maxakamadaha al-Shabaab oo ah kuwo fulintooda lagu qasban yahay, laguna kasloon yahay marka la barbardhigo maxakamadaha dowladda. Sidaas darteed, nidaamka maamulka dhulka Soomaaliya waxa ku gadaaman xukun lakabeedyo dhowr ah, iyada oo xeerka dhaqanka iyo sharciga Islaamku yihiin aasaaska xukunnada heerarka dowladda, marka loo eego qaabdhismeedka maamulka dhulka (meelaha ay ka jiraan) iyo waxqabadka dadka iyo kooxaha awoodda badan. Dibu-eegista Bangiga Adduunka ee Magaalaynta Soomaaliya (2020, 14) waxa uu nidaamkan ku qeexayaa "maamul iskudhafan" halkaas "oo ay ka jiraan maamul lakabeedyo dhowr ahi… maamulka dhabta ahi waxa uu ku jiraa gacmaha oday dhaqameedka, madaxda ganacsiga, hoggaamiyayaasha maleeshiyaadka, kooxaha rayidka ah iyo wadaaddada."

Maamulladan tartamaya iyo kuwa isbahaysanaya, ayaa abuuray nidaam shabakadeed oo aan falcelintiisa la saadaalin karin, halkaas oo "xidhiidhka uu midba midka kale la leeyahay ku aroorayo isxulufaysi iyo awood-qaybsi jaantaa rogan ah'(Somali Urbanization Review, 2020, 14), kuwaas oo abuuray shabakado maamul oo iskhilaafsan marka la joogo xaaladaha gaar ah, iyo fursadaha suuqaysiga. Tani waxa ay abuurtay in ay jirto xaalad ah "in uu maamulka dhulku noqdo mid ay isku xidhnaantiisu xaddidan tahay oo kala badaxbannaanaan, kaas oo ay ugu wacan tahay tartanka ka dhexeeya hay'adaha ay qusayso, oo aanu waajibaadkoodu caddayn oo uu isku qasan yahay, iyo sida oo kale in ay aad u daran tahay kala qaybsanaanta hay'aduhu, taas oo xaddiday isku xidhnaanta nidaamyada rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn-labadaba" (Somali Urbanization Review, 2020, 104). Sidaa darteed, maamulka dhulka Soomaaliya ayaa ah mid si qotodheer isugu mulaaqan –isuna rogrogi kara sida ugu fiican, ahna mid aan saadaalin karin heerka ugu xun, kaas oo aad ugu tiirsan gorgortan joogto ah.

## *Maamulka dhulka dowladda*

Saamaynta uu dagaalka sokeeye ku yeeshay maamulka dhulka waa mid lafjab ah oo qotadheer, taas oo si kasta u dhalanrogtay maaraynta iyo maamulka dhulka. Menkhaus (2017), oo uu soo xigtay Sanduuqa Xasilinta Soomaaliya, 2021) ayaa ku doodaya in "Maamulka dhulka oo aad u koobani yahay nidaam burbursan" maadaama diiwaannada iyo xogaha dhulka caasimaddu ku jiraan gacmo dad gaar ah, oo dalka dibaddiisa ku nool. Tani waxa ay mustaxeel ka dhigtay in la kala saaro documentiyada dhabta ah iyo kuwa been-abuurka ah (kuwaas oo caalami ahi); maadaama oo aanay shakhsiyaadka gaarka ahi haysannin tixraacyo cad.

Waxa intaas dheer, nidaamka maxakamaduhu waxa uu si weyn ugu nugul yahay cadaadiska kaga imanaya shakhsiyaadka awoodda leh iyo waliba musuqmaasuqa badheedhka ah, taas oo xaaladda muranka dhulka ka dhigaysa mid qallafsan oo halis badan. Tan iyo markii ay dowladdii dhexe duntay 1991, may jirin siyaasado qaran iyo isku dayo dibuhabayneed oo dhulka quseeyaa. Dastuurka kumeelgaadhka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (ee la ansixiyay 2012) ayaa ah sharciga qaran ee kaliya ee tixraac u ah dhulka Soomaaliya, kaas oo difaacaya xuquuqaha ay Soomaalidu u leedahay in ay hanti yeelato, iibiso, kuna wareejiso takoor la'aan. Si kastaba ha ahaatee, waxa biyo kama dhibcaan ah in ay dowladda hadheeyeen caqabado awoodeed oo docayaal ahi; tan iyo markii la dhisay dowladda Federaalka Soomaaliya 2012, iyo aasaaska sharciyadaha dhulka ayaa ah hawl weli qabyo ka ah dowlad-dhiska Soomaaliya. Sharciyada dhulka ee lagaga dhaqmo dalka intiisa badan, waxa laga dhaxlay, laguna ansixiyey dowladihii ka horraysay dagaallada sokeeye. Tani waxa ay horseedday in la adeegsado nidaam sharci oo gaboobay, kaas oo ku guuldarraystay in lagu xukumo xaqiiqooyinka ku gadaaman maamulka dhulka ee casriga ah. Xaqiiqatan, weli qaabdhismeedka sharcigu waxa uu ku socdaa kala saaridda daminyaale (dhul si joogto ah loo isticmaalo) iyo munishibaale (dhul si ku meelgaadh ah loo isticmaalo), halkaas oo aan dhulka kumeelgaadhka ah laga dhisan karin dhismayaal joogto ah, balse kaliya waxa laga dhisan karaa dhismayaal kumeelgaadhka ah sida, 'baraako, cariish, mutulle, aqal-Soomaali' (Xeer No. 10, qodonka 5).

Ficil ahaan, farqigani waxa uu saamayn kooban ku leeyahay adeegsiga dhulka, maadaama dhulkii markii hore loo diiwaangaliyay isticmaal kumeelgaadh ah, markii danbe badankoodii laga dhistay dhismayaal abadi/joogto ah. Sida uu Sanduuqa Xasilinta Soomaaliya (2021, 32) ku doodayo, "waa nasiib darro in lagu tallaabsan kari waayo aasaaska qaabdhismeed ku habboon maamulka dhulka Soomaaliya, maadaama siyaasadda, sharciga, iyo qaabdhismeedkii hay'adihii ka horreeyay dagaallada yihiin kuwo gaboobay oo goldaloolooyin badan, kuwaas oo in lagu sii dhaqmaa tahay isha ugu weyn ee khilaafaadka." Qaab-dhismeedyadan sharci-dejineed ee duugoobay waxa mararka qaar si cad loogu adeegsadaa khilaafaadka casriga ah, laakiin in ay ku habboonaadaan ujeeddada laga leeyahay ayaa ah mid dhif iyo naadir ah marka loo eego goldaloolooyinka waaweyn iyo dhaqaalowga dhulka casriga ah.

## *Dowlad-goboleeddada iyo maamullada*

Iyada oo uu distuurka kumeelgaadhka ahi dhigayo in ay DFS "dajiso siyaad qaran oo dhuleed," (Cutubka 3, qodobka 3), haddana waxa uu Dowlad-goboleeddadau ogolayaa in ay sida oo kale dejiyaan siyaasado dhul (qodobka 3, farqaddiisa g). Sida caadiga ah, Dowlad-goboleeddadu waxa ay leeyihiin qodobbo dhowraya xuquuqda lahaanshaha iyo xaqa uu qofkastaa u leeyahay in uu hantidiisa ugu tagrifalo si takoor la'aan ah. Dowlad-goboleeddada badankoodu waxa ay wadaagaan hawlo cayiman: Wasaaradda Hawlaha Guud waxa ay u xilsaaran tahay qorshaynta bixinta dhulka iyo guriyeynta; Garsoorku waxa uu u xilsaaran yahay xallinta khilaafaadka; Wasaaradaha Beeraha iyo Kalluumaysigu waxa ay u xilsaaran tahay maamulka waxsoosaarka iyo cuntada; halka uu booliisku u xilsaaran yahay adeegyada amniga gobolka iyo fulinta awaamiirta maxakamadda. Si kastaba ha ahaatee, awoodda iyo adeegyada dowladdu waa kuwo laciif ah, (meelaha ay ka jiraan), qawaaniintuna waa kuwo si fudud loo jabin karo. Dowlad-goboleeddadu si weyn ayay ugu kala duwan yihiin xaddiga iyo xaalad qusaynta sharuucda jirta iyo heerka fulinta dhabta ah. Maqnaansha sharci si cad u kala xadaynaya doorarka dowlad-goboleeddada iyo kuwa degmooyinka dartii, "waxa ay inta badan wasaaradaha heer gobol ka shaqeeyaan hawlaha dawladaha hoose iyo maamulka magaalada" sababta oo ah waxa ay caqabado awoodeed kala kulmaan"fursadaha ay wasaaraduhu u haystaan ballaarinta maamulka arrimaha gudaha" (Bangiga Adduunka, 2020), 93). Guudmarkan soo socdaa waxa uu ka duulayaa siyaasadaha iyo sharciyada dhulka ee ay dhowaan samaysteen dowlad-goboleedyadu, iyada oo si gaar ah diiradda loo saarayo farqiga u dhaxeeya hawlaha maamulka.

## *Puntland*

Puntland waa maamul xasiloon oo dhaca jihada waqooyi-bari ee dalka. Waxa uu samasytay sharciyo dhowr ah oo ku saabsan dhulka sida Xeerka Magaalaynta Dhulka ee 2000, kaas oo "dibu-dowladayn ku sameeyay Sharcigii Dhulka ee 1975, oo dhigayay in dhulka oo dhan dowladdu leedahay" (Legal Action Worldwide, 2015). Sannadkii 2005, ayay Puntland soo saartay sharci cusub oo ku saabsan arrimaha dhulka, kaas oo aan si cad u kala saaraynin doorarka wasaaradaha arrimaha gudaha iyo deegaanka reermiyiga ah iyo weliba shaqada dawladaha hoose" (UN-HABITAT, 2008, 147). Sannadkii 2020, ayaa uu Baarlamaanka Puntland ansixiyay Xeerka Maamulka Magaalaynta Dhulka, halkaas oo uu "markii ugu horraysay ku dejiyey" habraac cad oo ku saabsan maamulka iyo maaraynta magaalaynta dhulka." Dibuhabayntan waxa markiiba taageeray Barnaamijka Wadajirka Qaramada Midoobay, oo ah barnaamij ku saabsan arrimaha dowlaha hoose iyo Daadajinta Adeegbixinta (JPLG) (UN-HABITAT, 2020).

Waxa kale oo ay Puntland samaysay Maxakamadda Khilaafaadka Dhulka, oo looga golleeyahay in ay noqoto "hay'ad aan rasmi ahayn oo helitaankeedu fudud yahay" iyo "in la qaato hannaan ka dabacsan kii maxakamadaha caadiga ah", kaas oo suuragalinaya in si hufan loo maareeyo murannada dhulka (Legal Action Worldwide, 2015).

## *Jubbaland*

Jubbaland, waxa ay ku taallaa koonfurta Soomaaliya. Qoybo badan waxa maamusha al-Shabaab, gaar ahaan meelaha miyiga ah, waxa kale oo ay dagaallo dabadheeraaday ka jiraan gobolka Gedo. Sharci la magacbaxay Xeerka Maaraynta Dhulalka oo la meelmariyay 2018, ayaa maamul-goboleedkan u fasaxaya in uu samaysto hay'adda Maamulka Dhulka Jubbaland (JLA).

Sida uu xusay Bangiga Adduunku, "hay'adda la ansixiya[Maamulka Dhulka Jubbaland] waxa ay ku xidhan tahay madaxweynaha hadda jooga oo hindisay" (Bankiga Adduunka, 2020, 106), taas oo welwel weyn ku abuuraysa rejeda laga qabo in maamullada ka danbeeyaa u hoggaansami doonaan go'aannadan. Maamulka dhulka Jubbaland ayaa dhowaan ka guuray nidaamkii hore ee maamulka dhulka oo ahaa hab gacan-maal ah(analog) una guuray mid dhijitaal ah. Isbeddelkan ayaa ku yimid iskaashi ay sameeyeen waaxaha gaarka loo leeyahay.

Arrintan waxa ka mid ah in hab dhijitaal ah loo diiwaangeliyo dhulka dadka gaarka ah, si la abuuro khariirad dayax-gacmeed(satellite map), oo loo adeegsanayo diiwaangelinta dhulka iyo nidaamka ururinta canshuuraha iyo sida oo kale adeegsiga hannaan sawir-xogeed (QR-code based application", oo mulkiilayaasha dhulka u oggolaanaya in ay helaan seesaska iyo xudduudaha dhulalka diiwaangashan.

Warbixin ay dhowaan soo saartay Xoghaynta Khilaafaadka Goballada u qaabilsan Xalalka Waraa(ReDSS)(2019, 24) ayaa lagu soo gabagabeeyey in ay jiraan qodobbo lagu dhisayo "guddida isticmaalka iyo xallinta khilaafaadka dhulka", iyada oo ay dastuurka Jubbaland ku jiraan "xeerar horumarsan oo ku saabsan dhulka iyo xuquuqda lahaanshaha". Muddadii kumeelgaadhka ahayd ilaa tan iyo markii la daabacay warbixintan REDSS, waxa la magacaabay 11-xubnood oo ka kooban guddida isticmaalka iyo xallinta khilaafaadka dhulka, waxaana ka hawlgalay siddeed qof oo ku soo baxay cod aqlabiyad ah (ku ansaxay aqoon-iswaydaarsiga, Juun 30, 2023).

Si kastaba ha ahaatee, waa biyo kama dhibcaan ah in ay hay'adaha dowliga ah iyo kuwa aan dowliga ahayniba door muhiim ah ka qaataan maamulka dhulka Jubbaland. Shabakadda Caalamiga ah ee Agabka Dhulka (Global Land Tools Network, 2020, 5), ayaa ku doodaysa in ay maamullada dhaqanku "door muhiim ah" ka ciyaaraan maamulka dhulka sida "maamulka iyo maaraynta dhulka". Inkasta oo aanu jirin sharci dhuleed oo sax ahi, haddana waxa inta badan maamulka dhulka si toos ah gacanta ugu haya maamulka dowlad-goboleedka" (Bangiga Adduunka, 2020, 105). Sida oo kale, al-Shabaab waa jile muhiim u ah xallinta khilaafaadka dhulka, iyada oo bixisa " adeegyo maamul oo u dhigma kuwa dowladda, gaar ahaan meelaha miyiga ah ee ay iyadu gacanta ku hayso; halkaas oo ay xalliso khilaafaadka dhulka," xitaa iyada oo ay waxqabadkeeda ka mid yihiin barakacinta dadweynuhu" (Global Land Tools Network, 2020, 24). (Global).

## *Koonfurgalbeed*

Maamulka Koonfurgalbeed waxa uu ku yaallaa koonfurta Soomaaliya. Sannadkii 2022, ayaa uu Baarlamaanka Koonfurgalbeed ansixiyay Xeerka Maamulka Magaalaynta Dhulka, oo ay soo jeedisay Wasaaradda Hawlaha Guud ee maamul-goboleedka Koonfurgalbeed (2022). "Hannaan-sharciyeedkan dhulka ku salaysan" (Bangiga Adduunka, 2020, 105) weli lama dhaqangelin, laakiin aadbay u fog tahay gaadhitaanka hamilooyinkiisu. Dibu-eegista Magaalooyinka Soomaaliya (2020) ayaa xustay in ay ujeeddada sharcigu tahay "ilaalinta amniga lahaanshaha… iswaafajinta waajibaadka hay'adaha, fududaynta habraacyada iyo adeegyada maamulka dhulka, iyo in la ilaaliyo diiwaannada dhulka ee saxda ah". Sharcigu waxa uu maamulka dhulka u qaybiyaa laba qaybood oo kala ah hawlaha maamul-goboleedka iyo kuwa dowladaha hoose. Wasaaradda Howlaha Guud ee Koonfurgalbeed ayaa u xilsaaran iswaafajinta qorshayaasha magaalada ee ku saabsan dhammaan hawlaha maamullada dowladaha hoose; iyada oo loo marayo Xafiiska Dhulka ee Qorshaynta Magaalooyinka. Waxa kale oo uu (Qodobka 7) ee sharcigu dhigayaa Diiwaangelinta Dhulka Maamul-goboleedka, kaas oo ka kooban "dhammaanba diwaangelinta kala-iibsiga dhulka magaalooyinka ah ee la qorsheeyay iyo degmooyinka ay bixiyaan dowladaha hoose".

Dowladaha hoose ayaa ka masuul ah maamulka dhulka sida uu qabo sharcigani. Sida ku cad qodobka 25-aad "Awoodda dhul lagu siinayo cid gaar ah waxa iska leh dowladda hoose, mana jirto hay'ad kale oo dowladeed oo sheegan karta in ay awood u leedahay bixinta dhulka". Dowladaha hoose ayaa sida oo kale ka masuul ah abuurista nidaam lagu "kaydiyo macluumaadka la xidhiidha dhulka iyo hantida maguurtada ah" (Qodobka 25, farqadda c). Sida oo kale, masuuliyadda qorshaynta magaalada waxa leh dowladda hoose (Qodobka 33).

Sharcigu, waxa uu si cad u kala qeexayaa doorarka kala nooca ah ee ay leeyihiin hay'adaha kala duwani, isaga oo yaraynaya isku murugga maamulka, islamarkaana abuuraya guddi maamul-goboleed oo ka masuul ah Dhulka iyo Qorshaynta Magaalooyinka, iyada oo qaybo ka mid ah doorarka maamulka u daadajinaysa dowladaha hoose. Waxa kale oo ay si gaar ah uga hadlaysaa ka hortagga waxyaalaha dhaliya Barakaca, waxaanay waajibinaysaa in la sameeyo Maxakamadda Khilaafaadka Dhulka.Waxa uu sharcigu muhiimad gaar ah siinayaa tixgalinta diiwaannadii taariikhiga ahaa ee dhowaan lumay iyo kuwii hore ee baaba'ay, waxaanu diiwaannada canshuurbixinta siinayaa doorka caddaynta aqoonsiga lahaanshaha marka la eego xaaladaha khilaafka. Halka ay dhaqangelinta sharcigu ka tahay mid bilow ah, taas oo ay ku xeeran yihiin walaacyo la xidhiidha sida loo xallinayo heliyaanka dhulka iyo u sinnaanta jinsiga marka loo eego waajihidda xaqiiqada dunida(Bangiga Adduunka, 2020, 96). Tani waxa ay lafdhabar u tahay sharciga Soomaaliya oo ku sugan xaalad nugul.

## Galmudug

Bishii Feebaraayo 2022, ayaa uu madaxweynaha Galmudug saxeexay sharci ay ansixiyeen baarlamaanka dowlad-goboleedka Galmudug, kaas oo markii ugu horraysay isku dubbariday nidaamka Maamulka Magaalaynta Dhulka. Tan, ayaa dabasocotay sharci la mid ah, oo la ansixiyay 2020, kaas oo abuuray hannaan sharci oo loogu talagalay maamulka dhulka miyiga ah iyo dhul beereedka. Xeerka Maamulka Magaalaynta Dhulka Galmudug ayaa looga golleeyahay in lagu kala saaro shaqooyinka heer dowlad-goboleed iyo kuwa heer deegaan, iyada oo la qeexayo sida uu maamulka dhulku u kala quseeyo heerarka dowladda, iyo in la dardargeliyo abuurista hannaan maamul oo ay dowladaha hoose dhulka ku maamulaan. Dowlad-goboleedka Galmudug ayaa Wasaaradda Hawlaha Guud u xilsaaray qorshaynta iyo iswaafajinta hawlaha qorshaynta magaalooyinka.

Sharcigu, waxa kale oo uu dowladaha hoose u xilsaaray diiwaangelinta, qaybinta, xallinta khilaafaadka iyo hantida dhulka magaalooyinka ah. Si la mid ah dowladaha hoose ee Koonfurgalbeed iyo Jubbaland, waxa ay dowladda hoose ee Galmudug ka masuul tahay qorshaynta magaalooyinka iyo jaangooyada dhulka – marka laga reebo dhulalka loo qoondeeyay madaarrada, dekedaha, saldhigyada ciidamada, iyo adeegyada kale ee dowladda.  Hawlaha qorshaynta magaaloyinka waxa gacan ka gaysta wasaaradda hawlaha guud ee heer dowlad-goboleed, iyada oo goobaha gaar loo qoodaynayo warshado iyo guryo deegaanka ah, iyo jidad gaadiidka. Hirgalintii sharcigan ka dib, waxa ay magaalooyinka Dhuusamareeb iyo Hobyo soo jeediyeen in la horumariyo qorshaha magaalada, iyada oo la filayo in magaalooyinka kale ee Galmudug ku dayan doonaan.

## Hirshabeelle

Dowlad-goboleedka Hirshabeelle waxa uu dhacaa bartamaha Soomaaliya. Inkasta oo uu jiro sharci qabyo ahi,haddana weli lama soo saarin sharci lagu maamulo dhulka. Waxa kale oo aad u yar cilmibaadhisaha iyo qaraallada kale ee siyaasadda ee lagu lafaguray ama ku saabsan habdhaqanka maamulka dhulka Hirshabeelle. Sida ay xuseen khubarada ka soo jeeda gobolku(aqoon-iswaydaarsiga ansixinta, Juun 30, 2023), natiijadani waxa ay ka dhalatay xasillooni darrada baahsan ee gobolka. Waxa jirta baahi weyn oo loo qabo in cilmibaadhis dheeraad ah laga sameeyo xaaladda Hirshabeelle.

## Somaliland

Somaliland waa dowlad ku dhawaaqday in ay ka go'ay koonfurta Soomaaliya, isuna maamulaysay si madaxbannaan tan iyo 1990-aadkii. Marka laga yimaaddo dastuurka Somaliland (2001), kaas oo ilaalinaya xuquuqaha dhulka iyo hantida, waxa ay Somaliland leedahay Xeerka Madaniga iyo Xeerka Habraaca Madaniga ah, kuwaas oo nidaamiya lahaanshaha hantida iyo kala-iibsiga dhulka (Legal Action Worldwide, 2015, 10). Sida oo kale, waxa jira xeerka lahaanshaha dhulka beeraha oo soo baxay 1999, kaas oo ka hadlaya dhulka miyiga ah, iyo xaqa ay Wasaaradda Beeruhu u leedahay qoondaynta dhul-beereedka (UN-HABITAT, 2008, 149). Warbixinta ku saabsan Dhulka, Guriyaynta, iyo Hantida (2008, 149) ayaa ku doodaysa in madmadow badani ku jiro sharciga ku saabsan dhul-daaqeenka iyo sida loo maalulayo lahaanshaha dhulka reer guuraaga. Sharciyada kale sida Xeerka Xallinta Khilaafaadka Magaalaynta Dhulka ee 2014, ayaa maamulka awoodda maaraynta dhulka siinaya maxakamadaha. Hase yeeshee, sharcigani ma caddaynayo wasaaradda toos uga masuulka ah maxakamadaha, ama goorta ay maxakamadahu hawshan la wareegayaan (Legal Action Worldwide, 2015, 10).

## Maamulka Gobolka Banaadir (Muqdisho)

Maqaamka magaalada Muqdisho ee dastuuriga ah ayaan weli xal loo helin, waxaana lagu wadaa in go'aan laga gaadho kadib marka dibu-eegis lagu sameeyo dastuurka, taasina waa hawl weli socota. Waqti xaadirkan, Muqdisho waa caasimadda Soomaaliya, laakiin ma aha dowlad-goboleed federaal ah, mana matalo dowlad-goboleed federaal ahi. Maqaamka Muqdisho oo ah xaq caasimadeed oo dastuuriga ah ayaa ah mawduuc xasaasi ah, waxaana ku gadaaman arrimo badan oo ku saabsan maamulkeeda, gaar ahaan dhinaca maamulka dhulka. Maqaamka Muqdisho oo weli lagu muransan yahay awgeed, ma jiro sharci ka dambeeyay dagaalladii sokeeye, oo ku saabsan maamulka iyo maaraynta dhulkeeda. Sidaa darteed, maamulladu waxa ay ku shaqeeyaan sharciyadii hore ee dhulka.

Maamulka Gobolka Banaadir (MGB) ayaa ka masuul ah hawlo badan oo la xidhiidha maamulka dhulka Muqdisho, isaga oo dheeganaya hawlo badan oo la mid ah kuwa dowlad-goboleedyada. Inkasta oo ay curyaamiyeen caqabado awoodeed, kuwo dhaqaale, iyo faragelinta hay'adaha heer qaran, haddana waaxda Dhulka ee Maamulka Gobolka Banaadir, waxa ay ka masuul ka tahay howlo badan oo muhiim ah oo la xidhiidha maamulka dhulka (Maamulka Gobolka Banaadir, 2016).

Sababo ka dhashay caqabado la xidhiidha dhanka kartida dartood,waxa uu Maamulka Gobolka Banaadir fuliyaa masuuliyado aad uga yar intii sharcigu siiyay. Ma sii diiwangeliyo, mana sii qaybinayo goobo cusub oo ah dhul magaalo, sida oo kale ma rari karo, mana dumin karo dhisme sharci darro ah. Taa beddelkeeda, dowlaha hoose ee ku shaqeeya diiwaangalinta casriga ahi waxa ay kala wareejiyaan lahaanshaha dhulka shakhsiyaadku leeyihiin(Maxamed, 2021).

Inkasta oo uu Maamulka Gobolka Banaadir masuul ka yahay dhammaan hawlaha qorshaynta hindisayaasha magaalooyinka, haddana imika waxa arrimahaas ku lug leh Wasaaradda Hawlaha Guud, Dibudhiska iyo Guryeynta Qaranka. Qorshayaasha hindisayaashani waa kuwo xaddidan oo aan saamayn badan ku lahayn sida dhulka loo bixinayo ama loo isticmaalayo, iyada oo magaaladu si xawli ah u dhismayso.

# 4. Khilaafka Dhulka

khilaafka la xidhiidha arrimaha dhulka ayaa ah sababta ugu weyn ee Soomaaliya ka ridday dagaalladii sokeeye, welina waa tabtii, oo waa halka ay saarta amnigu ka qudhunsan tahay.

Qaybtani, waxa ay sahaminaysaa: taariikhaha khilaafaadka dhulka; magaalaynta; tartanka loogu jiro helitaanka khayraadka dabiiciga ah; iyo barakicinta qasabka ah. Waxa jira mawduucyo qaayo badan, oo soo koobaya arrimaha ay ka mid yihiin: farqiga u dhexeeya awoodda qabiilka (taas oo bulshooyinka tamarta daran ka dhigaysa kuwo u nugul boobka iyo xadgudubyada la gula kacayo hantidooda); Awood darrada gobolka (ayaa uga sii daraysa xiisadaha jira); sida oo kale xaalufinta deegaanka (ayaa sii kordhinaysa tartanka loogu jiro ilaha biyaha, iyada oo barakac xoog leh keenta xilliyada abaarta iyo macaluusha).

## *Khilaafaadka dhulka iyo Xiisadaha taariikhiga ah*

Soomaaliya, waxaa ka jira xiisado la xidhiidha khilaafaadka dhulka oo soo taxnaa illaa iyo markii ay bilaabmeen maamullada dhulku qarnigii 20-aad, kuwaas oo soo shaacbaxay waayadii gumaysiga, xilligii taliska militariga, iyo dharaarihihii dagaallada sokeeye. Taariikhda dhow ee ku dhereran dagaallada sokeeye ayay cirka isku sii shareereen khilaafaadka dhulku marka loo eego lahaanshaha, helitaanka, iyo isticmaalka dhulka. Sanduuqa Xasillinta Soomaaliya (2021, 33) ayaa tabashooyinka taariikhiga ah ee dhulka ku tilmaamay “dhib muuqata oo ka hadalkeeda la isdiidsiinayo [sakaaro saalo la arkayo ayay aastaa] marka ay timaado horumarinta iyo hirgelinta qaabdhismeedka maamul dhuleed oo dhammaystirani,” maadaama aanay jirin dibuheshiisiin iyo in la qiro arrinta dhulka ee xiisadaha xasaasiga ahi ku gadaaman yihiin, kaas oo noqday isha qalalaasaha siyaasadda iyo saluugga joogtada ah. Garsoor itaal daran ayaa la daalaadhacaya in uu maamulo dad ku tartamaya sheegashada lahaanshaha dhulka iyo guuldarrooyinka xallinta murannada, iyada oo uu sharcigu hagayo khilaafaadka gudaha iyo isku dhacyada gacan ka hadalka ah.

## *Magaalaynta iyo dabarakaca qasabka ah*

Maadaama oo ay magaalooyinka Soomaaliya aad ugu korayaan si bilaa qorshaynn ah, waxa garab socda korodhka khilaafaadka dhulka. Mar haddii ay magaalooyin badani si degdeg ah ugu fideen dhulkii magaalooyinka u dhowaa iyo meelihii miyiga ahaaba, waxa soo ifbaxaya tabashooyin la xidhiidha xuduudaha sharci-dejinta mustaqbalka iyo qalalaasa ka dhasha arrimaha dhulka ee dhaqan ahaan loo xalliyo. Si kastaba ha ahaatee, xarumaha magaalooyinka Soomaaliya ee ay dagaalladu ka socdaan iyo cawaaqib xumooyinka tirada badan ee la xidhiidha qabsashada dhul aad u ballaadhan iyo barakacinta qasabka ah ayaa barbilow u ah dhacdooyinkan. Muqdisho, mulkiilayaashii hore ee dhulka oo dalka ka dhoofay bilowgii dagaallada sokeeye ayaa dib ugu soo laabtay dalka, kuwaas  oo la kowsaday muranno iyo khilaafaad dhulleed oo hor leh.

Maadaama oo uu dagaal hubaysani ka socdo meelo ka mid ah miyiga, dad badan ayaa u soo qaxay maalooyinka, iyaga oo raadinaya, "amni, adeegyo bulsho, fursado ay noloshoodu ku xasisho iyo horumar dhaqaale" (Somali Stability Fund, 2021, 29). Si kastaba ha ahaatee,  barakayaasha gudaha ayaa buulal ka samaystay koonayaasha magaalada sida dhul iyo hanti dowladeed iyo kuwo dad gaar ahi leeyihiin labadaba. Reermiyiga ku soo barakacay magaalooyinka ayaa qabsaday dhul bannaan oo ay hore u lahaayeen dowladda iyo dad gaar ahiba, taas kor u sii qaadday murannadii dhulka" (World Bank, 2020, 103).

## *Tartanka loogu jiro hansahda khayraadka dabiiciga ah*

Tartanka loogu jiro hanashada khayraadka dabiiciga ah sida biyaha iyo dhul-daaqeenka ayaa weli ah isha ugu weyn ee uu ka yimaaddo khilaafaadka dhulku. Bulshooyinka xoolo-dhaqatada iyo beeralayda ayaa ah kuwo u nugul isbeddelka cimilada aan la saadaalin karin cidhibdanbeedkeeda, waxaana lagama maarmaan ah in ay helaan khayraad dabeeci ah si ay noloshoodu u xasisho. Si kastaba ha ahaatee, "nugayl dowladeed oo soo taxnaa muddo tobannaan sano ah ayaa curyaamisay khayraadka dabiiciga ah, maamulka iyo awoodaha hay'adaha dowladdu u leeyihiin in ay xakameeyaan tartanka helitaanka khayraadka dabiiciga ah," (Somalia Stability Fund, 2021, 22), waxa uga sii daray kor u kaca xiisadaha. Xilliyada ay jiraan xaaladaha darani sida abaaraha, waxa ay bulshooyinku naftooda ku badbaadin karaan jid rabshadeed. Maadaama fiditaanka magaalooyinka Soomaaliya horseeday qalalaase ka dhasha khayraadka miyiga, "isdhexgalka ku yimid xoolo-dhaqatada iyo reermagaalka dega koonayaasha magaalooyinka iyo magaalooyinka laftooda ayaa kor u qaaday murannada (Somalia Stability Fund, 2021, 28) ku saabsan isticmaalka iyo helitaanka dhulka.

## 5. Gabagabada iyo cilmibaadhis kale

Waxa maamulka dhulka Soomaaliya hadheeyay caqabado ay ka mid yihiin tamar la'aan dowladeed, isku qasnaan maamul oo madmadow ku jiro masuuliyadda maamulka dhulka iyo raadadkii laga dhaxlay nidaamkii dowladihii qarnigii 20-aad, iyo cawaaqib-xumooyin weli taagan oo dhalin kara dagaallo lagu riiqdo. Laakiin waxa jira marar la haysto fursado muhiim u ah baadhitaanka iyo tixgelinta mustaqbalka, kuwaas oo ay natiijadooda isticmaali karaan jaangooyayaasha siyaasadda iyo saaxiibbada caalamiga ahi. In galdalooloooyinkan muhiimka ah lagu eego indhaha cilmibaadhisaha aqoonta ku dhisan iyo tixraacyada diiwaannada siyaasadda, ayaa waxtar weyn u ah cilmibaadhayaasha mustaqbalka iyo cid kasta oo doonaysa in ay gacan ka gaysato tallaabooyinka dibuhabaynta dhulka Soomaaliya.

- **Hannaanka maamulka dhulka maxalliga ah iyo hufnaantiisa:** inta badan dhigaallada cilmigu waxa ay quseeyaan nidaamyada aan dowliga ahayn (sida Xeer-dhaqameedka Soomaalida iyo sharciga Islaamka), waana kuwo si guud loo qoray, oo dabci ahaan kooban, waxaana sababay dhibaatooyinka amniga la xidhiidha iyo sida oo kale xog la'aan caqabad weyn ku ah in raadraac cilmibaadhiseed laga sameeyo arrimaha xasaasiga ah. Waxa aad u wanaagsan ayay noqon lahayd in la helo khibradihii laga dhaxlay maamulka dhulka (dowladda iyo kuwa aan dowliga ahayn) si loogu kuurgalo maamullada heer bulsho iyo kuwa heer xaafadeed, iyada oo aan muhiimad weyn la siinaynin isbarbardhiga tuulooyinka, magaalooyinka, iyo xitaa dalka oo dhan.

- **Hababka maamulka iyo taariikhaha ku salaysan isticmaalka dhulka:** Waxa jira goldaloolooyin cilmibaadhiseed oo laxaad leh, marka laga reebo tixraacyada ilaha gumaysiga, ee ku quseeya hab-dhaqanka iyo fahamka maamulka dhulka Soomaalida. Taariikhaha kutidhi-kuteenta ah ee uu jiilba jiilka ka danbeeya u gudbiyo ayaa noqon kara kaydad qarsoon, kuwaas oo aan weli si buuxda loo baadhin; waana muhiim in sidaas la sameeyaa.

- **Isku xidhnaanta dhalashada iyo maamulka dhulka:** maadaama ay Soomaaliya isu diyaarinayso doorasho qof iyo cod ah iyo in ay wax ka beddesho qaabdhismeedka siyaasadda dalka, waxa loo baahan yahay in aqoon durugsan loo yeesho afkaaraha ku salaysan lahaanshaha, waddaniyadda bulshada, iyo fahamka ay ka haystaan xuquuqaha helitaanka iyo isticmaalka dhulka.

- **Waaxda gaarka loo leeyahay, ayaa door laxaad leh ka ciyaarta horumarinta hababka cusub ee la xidhiidha maamulka iyo sharci-dejinta dhulka.** Gaar ahaan Jubbaland iyo Koonfurgalbeed, waxa dhismaha iyo dayactirka dhulka dowladda door laxaad leh ka qaadatay waaxda gaarka loo leeyahay. Waxa jirta baahi loo qabo in la fahmo isbeddellada lammaanaha ah ee kala ah dhijitaalaynta diiwaannada dhulka iyo waaxda gaarka loo leeyahay ee u sii dhuranaya in ay lafdhabar u noqoto bixinta adeegyada muwaadiniinta ee maalinlaha ah. Iskaashiga dowladda iyo waaxda gaarka loo leeyahay ayaa muhiimad weyn u yeelan doona jidadka magaalaynta caasimadaha Soomaaliya ee sida xawliga ah u kobcaya.

# 6. Bibliography

Bakonyi, J. (2015) 'Ideoscapes in the World Society: Framing Violence in Somalia', Civil Wars, 17(2), pp. 242–265. Available at: https://doi.org/10.1080/13698249.2015.1070456

Bakonyi, J. (2021a) 'The Political Economy of Displacement: Rent Seeking, Dispossessions and Precarious Mobility in Somali Cities', Global Policy, 12(S2), pp. 10–22. Available at: https://doi.org/10.1111/1758-5899.12849

Bakonyi, J. (2021b) 'The Political Economy of Displacement: Rent Seeking, Dispossessions and Precarious Mobility in Somali Cities', Global Policy, 12(S2), pp. 10–22. Available at: https://doi.org/10.1111/1758-5899.12849

Bakonyi, J., Chonka, P. and Stuvøy, K. (2019) 'War and city-making in Somalia: Property, power and disposable lives', Political Geography, 73, pp. 82–91. Available at: https://doi.org/10.1016/j.polgeo.2019.05.009

Banaadir Regional Administration, Mogadishu Municipality (2016) Structure and TORs of Mogadishu Local Government. Mogadishu.

Barnes, D.C. (2006) 'U dhashay—Ku dhashay: Genealogical and Territorial Discourse in Somali History', Social Identities, 12(4), pp. 487–498. Available at: https://doi.org/10.1080/13504630600823718

Besteman, C. (1994) 'Individualisation and the assault on customary tenure in Africa: title registration programmes and the case of Somalia', Africa, 64(4), pp. 484–515.

Besteman, C. (1998) 'Primordialist Blinders: A Reply to I. M. Lewis', Cultural Anthropology, 13(1), pp. 109–120.

Bonnet, C. et al. (2020) 'Inclusive shelter provision in Mogadishu', Environment and Urbanization, 32(2), pp. 447–462. Available at: https://doi.org/10.1177/0956247820942086

Bryld, E., Kamau, C. and Mohamoud, M.A. (2020) 'Using an adaptive approach to making gatekeepers accountable to internally displaced persons in Mogadishu, Somalia', Development in Practice, 30(8), pp. 982–993.

Cassanelli, L. (1996) 'Explaining the Somali Crisis', in C. Besteman and L. Cassanelli (eds) The Struggle for Land in Southern Somalia: The War Behind the War. London: Haan Publishing.

Cassanelli, L. (2015) Hosts and Guests: A Historical Interpretation of Land Conflicts in Southern and Central Somalia. Rift Valley Institute.

Chonka, P. and Bakonyi, J. (2021) 'Precarious technoscapes: forced mobility and mobile connections at the urban margins', Journal of the British Academy., 9(s11), pp. 67–91. Available at: https://doi.org/10.5871/jba/009s11.067

Expanding Access to Justice Program (2020) Pathways and Institutions for Resolving Land Disputes in Mogadishu. Nairobi: Pact and the American Bar Association Rule of Law Initiative.

Galmudug State of Somalia, Xeerka Maaraynta Dhulka Galmudug (2022).

Global Land Tools Network and UN-HABITAT (2020) Land and Conflcit in Jubaland: Root Cause Analysis and Recommendations. Nairobi, Kenya.

Global Land Tools Network and UN-HABITAT (2022) Advancing Women's Land and Property Rights in the Somali Region. Nairobi, Kenya.

Guadagni, M. (1979) Somali land law: Agricultural land from tribal tenure and colonial administration to socialist reform. Doctoral Dissertation. School of Oriental and African Studies (University of London0.

Hagmann, T. et al. (2022) 'Commodified Cities – Urbanization and public goods in Somalia', Rift Valley Institute, p. 77.

Harris, S. (2015) Displacement and Housing, Land and Property Disputes in Puntland. Norwegian Refugee Council.

Hiraal Institute (2019) Doing Business in a War Zone: Somali Banks and Telecoms Providers. Mogadishu: Hiraal Institute.

Jubaland State of Somalia, Xeerka Maaryenta Dhulalka Jubaland (2018).

Kapteijns, L. (2013) Clan Cleansing in Somalia: The Ruinous Legacy of 1991. Philadelphia: University of Pennsylvania Press.

Legal Action Worldwide (2015) Harmonization of the Legal Systems Resolving Land Disputes in Somaliland and Puntland: Report and Recommendations. UN Joint Programme on Local Governance and Decentralized Service Delivery.

Ministry of Planning, Federal Government of Somalia (2020) Somali National Development Plan (2020-2024). Mogadishu, Somalia.

Ministry of Public Works, Southwest State (2022) Southwest state of Somalia parliament has unanimously approved the land law bill that was presented by the Ministry of Public Works- Southwest.

Mohamed, S. (2021) Space, Memory and the Politics of Reconstruction: Conflict-related Property Disputes in Mogadishu, Somalia. University of Cambridge.

Regional Durable Solutions Secretariate (2019) Contested Land: Study on Land Governance, Urbanization, and Forced Displacement in Somalia - Mogadishu, Kismayo and Baidoa.

Rift Valley Institute, H.I. for P.S. (2017) Land Matters in Mogadishu. Nairobi.

Roth, M. (1988) Somalia Land Policies and Agrarian Performance: The Case of the Lower Shabelli. Annual Symposium on Land in African Agrarian Systems.

Roth, M. and Bruce, J. (1988) Somalia: An Overview of Land Tenure Issues and Research.

Somali Democratic Republic (1980) Law Number 10.

Somalia Stability Fund (2021) Land Conflict in Somalia: Key Issues and Challenges for Transformation. Somalia Stability Fund, Adam Smith International.

Southwest State of Somalia, Urban Land Law of Southwest State of Somalia (2022)

The Federal Republic of Somalia Provisional Constitution (2012).

UN-HABITAT (2008) Land, Property and Housing in Somalia.

UN-HABITAT (2016) Towards Mogadishu Spatial Strategic Plan. Nairobi: UN-HABITAT, Joint Program on Local Governance and Decentralized Service Delivery, pp. 1–44. Available at: https://unhabitat.org/towards-mogadishu-spatial-strategic-plan

UN-HABITAT (2020) New Urban Land Management Law to guide land issues in Puntland, Somalia. Available at: https://unhabitat.org/news/17-aug-2020/new-urban-land-management-law-to-guide-land-issues-in-puntland-somalia

UN-HABITAT and Legal Action Worldwide (no date) Training Manual on Land Disputes before the Puntland Urban Land Dispute Tribunals.

United Nations Panel of Experts (2019) Letter dated 1 November 2019 from the Chair of the Security Council Committee pursuant to resolution 751 (1992) concerning Somalia addressed to the President of the Security Council. United Nations Security Council, pp. 1–161.

World Bank (2020) Somalia Urbanization Review: Fostering Cities as Anchors for Development. Washington DC: World Bank.

HERITAGE

INSTITUTE

The Heritage Institute for Policy Studies
http://www.heritageinstitute.org